

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadka Saad

Cadad Gaar ah

1/9/2016

**SHARCIGA XAKAMAYNTA HUBKA
IYO RASAATA DAGAALKA
XEER LR. 70/95**

Email: garyaqaankaguud@gmail.com

Web: www.garyaqaankaguud.com

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT



Sharci lambar 70/95 ee 27/11/95

Madaxweynaha JSL,

MARKUU DARSAY: Soo jeedinta Wasaaradda
Gaashaandhiga.

MARKUU HELAY: Ogolaanshaha Golaha
Wasiiradda.

MARKUU HELAY: Ansixinta Golaha Wakiilada.

Wuxuu Soo Saaray Sharciga Xakamaynta Hubka iyo Rasaasta Dagaalka.

Qodobka 1aad

- 1- Dhammaan hubka iyo rasaasta Dagaalka ee ay Dawladdu haysato ama hubka iyo Rasaasta Dagaalka la Qarameeyey ama la Qaramayn doono waa hanta Dawladeed.
- 2- Waxaa kale oo hanta Dawladeed ah.
 - a) Gaaddidka xambaarsan hubka iyo Rasaasta Dagaalka ee xubinta kowaad lagu sheegay.
 - b) Hubka iyo Rasaasta degta ay ku sitaan Ciidammada Qaranku.
 - c) Hubka iyo rasaaasta dagaalka ee dawladdu hanato ama la wareegto.

Qodobka 2aad

DIWAAN GELINTA HUBKA

- 1- Ciddii ama qofkii haysta hubka iyo Rasaasta dagaalka eek u jira gacan ka duwan tan Dawladda waa inay iska diiwaan geliyaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha muddo lix bilood gudahood.
- 2- Waxaa laga reebay xubinta laad ee kor ku tilmaaman, hubka iyo Rasaasta Oggolaanshaha lagu bixin karo eek u tilmaaman sharciga Nabad-Gelyadda Guud ee 1962kii.
- 3- Waxaa la diiwaan gelin hubka qof kaliyihi qaadan karo ee fudud sidaa (Qoriga AK iyo Bastoolad) looguna talo galay difaaca Nafta iyo hantida si sharciga waafaqasan.

Qodobka 3aad

KEENISTA IYO DHOFINTA HUBKA

Marka laga reebo Dawladda, waxaa reeban keenista iyo dhoofinta Hubka iyo Rasaasta Dagaalka.

Qodobka 4aad

IIBINTA IYO QADASHADA HUBKA

- 1- Marka lag reebo Dawladda waxaa reeban iibka hubka iyo Rasaasta Dagaalka.
- 2- Sidoo kale waxaa reeban ka ganacsiga soo dejinta, ka dilaalista Hubka iyo Rasaasta Dagaalka.

Qodobka 5aad

SAFRINTA-HUBKA

Waxaa reeaban safrinta Hubka iyo Rasaasta Dagaala iyadoo oggolaansho laga haysan Wasaaradda Gaashaan-dhiga.



Qodobka 6aad

SAMEYNTA IYO DAYACTIRKA HUBKA

Waxaa reeaban meel kasta oo ayna Dawladdu lahayn ama ayna oggolaan in loo adeegsan karo samaynta iyo dayac tirka hubka iyo rasaasta Dagaalka.

Qodobka 7aad

Xafidaada Hubka iyo Rasaasta Ciidamadda


- 1- Diiwaan gelinta xafidaada iyo maqaasinadda hubka iyo Rasaasta Dagaalka ee Ciidanka Qaranka, waxa lagu qeexidoonaa xeer-nidaamiye uu soo saano Wasiirka Gaashaandhigu.
- 2- Hubka iyo rasaasta yaala xeryihii Dawladda ee hore iyo wixii cusub eek u filiqsan wadanka ee hadana cidii la joogin xafidaadooda waxaa mas'uul ah Wasaaradda Gaashaandhiga.

Qodobka 8aad

MAMNUUCIDAA WAXYAABAHA QARXA

- 1- Hubkii Taliskii hore laga qabsadey ee aan gacanta Dawladda soo gelin kuna jira gacmo kale waa in muddo (3) bilood gudahoodaha lagu soo wareejiyaa Gacanta Dawladda.
- 2- Waxaa reeaban haysashada, ka ganacsiga iyo isticmaala hubka qarxa oo dhan:-

- 3- Hubka qarxa eek u jira gacanta ka duwan tan Dawladda, waa inay muddo lix bilood gudahood ah ugu soo wareejiyaan wasaaradda Gaashaandhiga.



Qodobka 9aad

CIQAABTA IYO AWOODA

- 1- Qof kasta oo ku xad gudba qodobka 2aad, 3aad, 4aad, 5aad, 6aad, iyo 8aad ee xeerkan, haddii aan falku dhalin dembi aad u culus waxa lagu ciqaabayaa (1) Hal sano ilaa (3) saddex sano oo xadhiga ah, iyo ganaax dhan sh. Sl. 30,000/= (soddon kun) Shillin Somaliland. Waana lala wareegayaa hubka, rasaasta, qalabka qarxa iyo Gaadiidka lagu sidaba.
- 2- Ku xad-gudubka xeerkan waxaa awood u leh xukunkiisa Maxkamadda Ciidammada, haddii ku xad gudubku uu ku yimaado xubno ka mida ah Ciidammada, hadiise uu shicib yahay xad-gudubuhu waxaa leh xukunkiisa Maxkamad Madaniga.

Qodobka 10aad

TIR TIRID

Waxaa la tir tiray shaarci kasta oo ka soo hor-jeeda Xeerkan.

Qodobka 11aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeezo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliland

(Maxamed Ibraahim Cigaal)

MADAXWEYNAHA JSL



